Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa

# Yeremyaah, Ninkii Ilinta



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Jonathan Hay

Waxa dhaqan-geliyay: Mary-Anne S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2023 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Yeremyaah wuxuu ku dhasahy guri diimeed oo ku yaalay boqortooyada Yuhuudda. Aabbihii, Xilqiyaaah, wuxuu ahaa wadaad.  Reerkooda waxay ku noolaayeen magaalo la yidhaahdo Canaatoot, aadna uga sii fogeyn Yerusaalem. Laga yaabee inay waallidiintii Yeremyaah ku fikirayeen inuu wadaad noqon doono - laakiinse Ilaah qorshe kale ayuu u hayay.





Wakhtigii Yereyaah dhashay, Dadkii Ilaah ma aysan ku nooleyn si waafaqsan Ereyga Ilaah. Ugu badann qofwalba, boqorka ayay ku hoos jireen iyagoo shaqaale ishooseysiiya u ah, waxayna caabudi jireen ilaahyo beenbeen ah - xitaa macbudka Ilaah dhexdiisa!

Markii uu
dhalinyarada
ahaa
Yeremyaah,
Ilaah baa la
halay isaga.



"Waxaan ku iqiin itaadadan dhalan."  Ilaah wuxuu ku yidhi Yeremyaah, "Oo waxaan qorsheeyey kolkaa ka dib inaad adiga iila hadahsid dadka."

Yeeritaanka Ilaah waxay ula muuqatay Yeremiyaah wax laga cabsado. "Alla, Rabiyow Ilaahyow" ayuu ku qayliyey, "Aniga ma hadli karo, waayo dhalinyaraa ahay." Caruur ma uusan ahayn, oo labaatan jir buu ahaa. Laakiinse Yeremyaah ma uusan ku xisaabtameen inuu hadalka Ilaah kula hadli karo kana soo horjeeda xumaanta ku hareersan isaga.



“Ha ka baqin,” ayuu Ilaah ku caymiyey Yeremyaah. “Tag meel walba oo aan kuu diro. Dheh waxwalba oo aan kuu sheego.



Aniga waan kula jiraa inaan kaa samato bixiyo.” Deedna Ilaah baa wax gaar ah u sameeyey. Ilaah wuxuu taabtay carrabkii Yeremyaah.

Ilaah wuxuu siiyey Yeremyaah, tabar, dhiirrigelin iyo xigmadba. Wuxuu kor ugu hadlay si geesinimo leh, oo xusuusiyey dadkii inuu Ilaah jecel yahay oo uu doonayo inuu caawiyo iyaga. Laakiin cidna ma ysan dhegeysan. Xita ilaa boqorkii.



Xitaa wadaaddadii baa ka cadhooday oo ku yidhi ka aamus waxyaalaha ku saabsan Ilaah. Waxaa kale oo jira nebiyo been ah oo dadak au sheegi jiray inuu wax aan jirin dadka u sheegayo oo runt aka fog.



Yeremyaah dadkii wuxuu xusuusiyey inay ahaato, waxyaale ku saabsan boqolaal samadood ka hor, boqrtooyadii woqooyiga ee Israa'iil ka guuray Ilaah.  Cadowyadoodii, Suuriyiintii, inay qabsadeen iyaga oo u ka kaxaysteen dhamantood Israaa'iiliyiintii meel fog.




Hadda dadkii Yuhuudda, boqrtooyadii koonfureed, Ilaah wuu ka guuray. Ciidamadii cadowgooda baa ku soo dhaqaaqay! Ilaah ma uu u ogaal doonaa in la qabsado oo iyaga sidii qaxooti ahaan ahaadaan iyagana?

Dadku waxay aaminsanaayeen sanamyada.
Sanamyada ma badbaadin karaan iyaga?
Maya! Ilaah keliya ayaa badbaadin kara.
Dadkii aad bay ugu cadhoodeen Yeremyaah,
waxay u sameeyeen shirqool lagu dilo isaga.
Laakiin Ilaah baa difaacay
addoonkiisii.



Ugu dambayntii, Ilaah baa waxyidhi inay waajib tahay oo uu ka naxay YEremyaah. “Dadkan waxba ha u baryin. Anigu ma dhegeysanayo iyaga markii ay ii soo qayliyaan inaan caawiyo.”



Yeremyaah wuxuu uga digay boqrkii in lagaga adkaan doono dagaalka lagula jiro ciidanka Baabiloon.  Boqrkii wuu cadhooday oo xabsi buu ku tuuray Yeremyaah. Xitaaa xabsig dhexdiisa Yeremyaah wuxuu sii wady wacdintiisii iyo rumaysadka Ilaah.



Ka dib markii uu ka soo baxay xabsiga Yeremyaah markale ayuu wacdiyey boqorkii iyo dadkiisii inay waajib tahay u soo noqoshada Ilaah iyo inay rumeystaan.

Wakhtigan, boqorkii hoos buu u dhaadhiciyey oo wuxuu sii geliyey dhiiqada gunteeda ee alambaqada.



Laakiin Ilaah baa ka dhex shaqeeyey qablbiga boqorka. Si qarsoon buu ugu tagay YEremyaah oo weyddiiyey isaga waxa uu Ilaah ka doonayo boqorka inuu sameeyo.

“Tag qafaalka, oo Ilaah wuxuu leeyahay waad noolaan doontaa.”



Sidaa bay jawaabtu ahayd.

Ciidankii Baabiloon way qabsadeen Yerusaalem iyo Yuhuudiya oo idil. Way dumiyeen derbiyadii iyo dhismooyinkii oo idil, way gubeen waxwalba. Ilaah wuxuu yidhi dadkiisa waxay qafaalnaan doonaa oo la haysan doonaa



toddobaatan sanadood, oo Isagaa dib ugu soo celin doono dhulkii ballanta.

# Yeremyaah, Ninkii Ilinta

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Yeremyaah

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa." Sabuurka 119:130


Dhammaad

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16